

# LIISKA HUBINTA KOOFID-19 EE MAALINLAHA EE (CARRUURTA KA YAR 18) EE CAAFIMAADKA ALBERTA

## Dulmar

Liiskan hubinta wuxuu khuseeyaa dhammaan carruurta, iyo ardayda dhigata xanaanada illaa Fasalka 12, oo ay ku jiraan ardayda dhigata dugsiga sare ee ka weyn 18 jir. Carruurta waxay u baahan karaan waalid ama ilaaliye ka caawiya inay dhammaystiraan qalabkan baaritaanka.

Haddii ilmahaaga u safray meel ka baxsan Kanada 14kii maalmood ee la soo dhaafay, raac tilmaamaha Socdaalka, Baaritaanta, Karantiilka iyo Xudduudaha Dawladda Kanada ([Government of Canada Travel, Testing, Quarantine and Borders](#)), oo ay ku jiraan shuruudo kasta oo loogu talagalay dadka socotada ah ee laga dhaafu waxa la xiriira ka qaybgalka deegaannada halista badan ka jira.

Haddii 10 kii maalmood ee la soo dhaafay, uu ilmahaaga ku wargeliyeen Caafimaadka Dadweynaha inay yihiin kiis<sup>3</sup> ee KOOFID-19, waxaa laga rabaa inay go'doomiyaan sida ku qoran tilmaamaha Caafimaadka Dadweynaha

## Su'aalaha Baaritaanka ee Carruurta ka yar 18 sano

1.	<p><b>Ilmahaaga ma la xiriiray kiiska<sup>2</sup> ee KOOFID-19 14 kii maalmood ee la soo dhaafay?</b>                  Xiriirka qoyska: qof ku nool isla gurigaas ee kiiska AMA ku jira is dhexgal joogto ah, muddo dheer, xiriir dhow la leh kiiska KOOFID-19. Tusaale ahaan, walaalayaal, qof seexday, ama qof si toos ah u bixiyay daryeelka toos ah ee ilmaha.</p>	HAA	MAYA
<p><b>Haddii ay jawaabta tahay "HAA" OO aan si buuxda loo tallaalin<sup>4</sup>:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>Ilmaha waa inuu guriga joogaa oo uusan xaadirin dugsiga, xanaanada carruurta iyo/ama waxqabadyo kale 14 maalmood laga bilaabo maalinta ugu dambaysay ee soo gaarista iyo dabagalka astaamaha. Haddii ilmahaaga leeyahay calaamado, u gudub su'aasha 2.</li> </ul> <p><b>Haddii jawaabta tahay "MAYA" su'aasha 1aad, u gudub su'aasha 2aad</b></p>			
2.	<p><b>Ilmaha ma leeyahay wax cusub (ama ka sii daraya) astaamaha asaasiga ah ee soo socda:</b></p> <p><b>Qandho</b> Heerkulka 38 darajo ama ka sareeya</p> <p><b>Qufac</b> Si joogto ah, ka badan sidii caadiga ahayd, oo aan la xiriirin sababaha kale ee la yaqaan ama xaaladaha sida neefta</p> <p><b>Neefta oo ku qabata</b> Si joogto ah, neefsasho ah, aan awoodin in si qoto dheer u neefsan karin, oo aan la xiriirin sababaha kale ee la yaqaan ama xaaladaha sida neefta</p> <p><b>Luminta dareenka urta ama dhadhanka</b> Aan la xiriirin sababaha kale ee la yaqaan ama xaaladaha sida xasaasiyadda ama xanuunnada neerfaha</p>	HAA	MAYA
<p><b>Haddii ilmaha ku jawaabo "HAA" astaamaha su'aasha 2aad:</b></p> <ul style="list-style-type: none"> <li>Ilmaha waxaa laga rabaa inuu 10 maalmood karantiil galo laga bilaabo maalinta uu astaamaha muujiyey sida ku cad Amarka <a href="#">CMOH Order</a>. AMA helay natiijo baaritaan ah inaan qabin KOOFID-19 ah oo aad dareento fiicnaan ka hor intaadan ku noqon hawlaha</li> </ul>			

- ☐ Adeegso Aaladda Qiimaynta Tooska ah ee Adeegyada Caafimaadka Alberta ([AHS Online Assessment Tool](#)) ama wac Khadka Caafimaadka (Health Link 811) si aad isugu diyaariso baaritaan iyo inaad hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan go'doonka.

**Haddii ilmaha ku jawaabay su'aasha 2aad "MAYA", u gudub su'aasha 3aad.**

3 Kiis shaybaar la xaqiijiyay AMA kiis dhici kara sida lagu qeexay Tilmaamaha Cudurka KOODID-19 ee Alberta ([Alberta COVID-19 Notifiable Disease Guideline](#))

4 Qof helay taxanaha tallaalka oo dhammaystiran ee KOOID-19 ayna ahayd 14 maalmood ka dib kuurada labaad ee laba taxane ah

3.	Ilmuha ma leeyahay wax cusub (ama ka sii daraya) astaamaha asaasiga ah ee soo socda		
	<b>Qarqaryo</b> Qandho la'aan, aan la xiriirin inaad dibadda joogtid cimilada qabow	HAA	MAYA
	<b>Cune xanuun/liqid xanuun leh</b> Aan la xiriirin sababaha/xaaladaha kale ee la yaqaan, sida xasaasiyadda xilliyeed ama soo noqoshada	HAA	MAYA
	<b>Diif/ciriiri</b> Aan la xiriirin sababaha/xaaladaha kale ee la yaqaan, sida xasaasiyad xilliyeedka ah ama banaanka ee cimilada qabow	HAA	MAYA
	<b>Dareemid caafimaad darro/daal</b> Tabar la'aan, quudinta liidata ee dhallaanka, oo aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee la yaqaan, sida niyad -jabka, hurdo la'aan, cillad tayroodh ama dhaawac degdeg ah	HAA	MAYA
	<b>Lalabbo, matag iyo/ama shuban</b> Aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee la yaqaan, sida walaaca, daawada ama cilladda mindhicirka ee xanaaqa	HAA	MAYA
	<b>Lumista rabitaanka cuntada</b> Aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee la yaqaan, sida walaaca ama daawada	HAA	MAYA
	<b>Murqo/xanuun wadajir ah</b> Aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee la yaqaan, sida arthritis -ka ama dhaawaca	HAA	MAYA
	<b>Madax xanuun</b> Aan la xiriirin sababaha ama xaaladaha kale ee la yaqaan, sida madax-xanuun nooca madax xannuun ama madax xannuun joogto ah	HAA	MAYA
	<b>Indho xanuun</b> (badanaa loo yaqaan isha casaan ah)	HAA	MAYA

**Haddii ilmaha "HAA" ugu jawaabay HAL calaamad su'aasha 3aad:**

- ☐ Ilmahaaga guriga ku hay oo la soco 24 saacadood.
- ☐ Haddii astaamahooda soo **hagaagayaan** 24 saac kadib, waxay ku noqon karaan dugsiga iyo dhaqdhaqaaqyada markay dareemaan inay ku filan yihiin inay tagaan. Baaritaanka lama huraan maaha.
- ☐ Haddii astaamaha aysan soo raynsan ama ka sii darin 24 saac kadib (ama haddii calaamado dheeraad ah soo baxaan), adeegso Aaladda Qiimaynta Khadka tooska ([AHS Online Assessment Tool](#)) ama wac Khadka Caafimaadka (Health Link) 811 si aad u hubiso haddii baaritaanka lagu taliyay.

**Haddii ilmaha ugu jawaabay "HAA" laba ama ka badan astaamaha su'aasha 3aad:**

- ☐ Ilmahaaga guriga ku hay.
- ☐ Adeegso Aaladda Qiimaynta Tooska ah ee ([AHS Online Assessment Tool](#)) ama wac Khadka Caafimaadka (Health Link) 811 si aad u go'aamiso haddii baaritaanka lagu taliyo.
- ☐ Ilmahaagu wuxuu ku laaban karaa dugsiga iyo waxqabadyada marka astaamihiisu dhammaadaan ilaa iyo ugu yaraan 24 saacadood tan iyo markii astaamahoodu bilaabmeen.

**Haddii ilmaha ku jawaabay "MAYA" dhammaan su'aalaha:**

Ilmahaaga wuu tagi karaa dugsiga, xannaanada carruurta iyo/ama hawlo kale

**Fadlan la socio:** Haddii ilmahaaga la kulmayo wax calaamado ah oo ka mid ah liisaska kor ku xusan, ha u keenin inay booqdaan xarun sii socota ama xarun daryeel degdeg ah 10 maalmood laga bilaabo markay calaamaduha ku bilaabmaan ama ilaa astaamaha xallinayaan (hadba mida soo horeysa), inay ku helaan Natijada baaritaanka KOOFID-19 oo aysan qabin waxaadna dareemeysaa fiicnaan.

Archived